

Siyaasadda JLC- Adeegyadaa Caafimaadka iyo Baahiyada Ardayga

Ku wareejinta daryeelka aan degdega ahayn

1. Ku socota takhtarada khaaska ah ama bukaan-eegtada

Waalidiintu mas'uul ayay ka yihiin daryeelka carruurtooda. Haddii uu waalidku codsado magac takhtar, waxaa Xarunta Wareejinta Daawaynta Bulshada ee Denver ku wareejin doontaa kalkaalisada dugsiga ama takhtarka dugsiga. Ma jiro shaqaale ka mid ah shaqaalaha dugsiga oo ku wareejin kara qoys takhtar gaar ah.

2. Ku socota Adeegaha Kalkaalinta

Maamulada, macalimiinta, shaqaalaha waxbarashada gaarka ah ama kuwo kale ayaa waxay u baahnaa doonaan macluumaad caafimaad dheeri ah oo ku saabsan ardayda qaarkood waana in ay la xariiraan shaqaalaha adeegga caafimaadka si ay uga helaan caawimaad taas oo kale ah. Kalkaalisada dugsiga ayaa la xariiri doonta dhammaan takhtarada khaaska ah ama xarumaha bukaanada lagu eego si ay u siiyaan macluumaad sugan ama caafimaad ammaan ah oo ku saabsan ardayga.

Macluumaad Caafimaad oo ku saabsan ardayda

1. Codsashada macluumaad caafimaad

Waa mas'uuliyada kaaliyaha Adeegga in uu sugo macluumaadka caafimaad ee ku saabsan ardayda macluumaad kaasi oo ka yimid takhtarada khaaska ah, isbitaalada ama xarumaha bukaan-eegtooyinka. Warqado Oggolaansho oo ka saxiixan waalidka xagiisa ayaa la heli doonaa si qaanuun ahaan loogu ilaaliyo takhtarka iyo dugsiyada.

2. Dirida macluumaadka caafimaadka

Warbixin caafimaad kasta oo loo diro Adeegga Kalkaalinta dib ayaa loo hubin doonaa waxaana lala wadaagi doona kalkaalisada dugsigga taasi oo ayaduna xageeda siin doonta macluumaadka maamulaha dugsiga ama macalinka codsada.

3. Helidda macluumaadka caafimaad ee uu helo dugsigga

Haddii warbixinta caafimaadka uu helo dugsigga, waa in la siiyaa kalkaalisada dugsigga. Haddii loo baahdo caawimaad dheeri ah ama turjumaan, Adeegga Kalkaalinta waa in lala xariiraa.

4. Siideynta macluumaadka caafimaadka ku saabsan

Goorta ay timaado codsasho qoran oo ah macluumaad caafimaad oona ku saabsan ardayda kana timid takhtarada, isbitaalada ama xarumaha bukaanad-eegtooyinka, waxaa loo baahanayaa oggolaanshaha waalidiinta si loo dhiibo macluumaad taasi oo kale ah. Warqado saxiixan oo oggolaansho ah ayaa la heli doonaa oo ka ahaatay codsadeyaasha.

Marka codsashooyin taleefoon ahaan loo soo gudbiyotakhtarada, isbitaalada, ama xarumaha bukaanad-eegtooyinka, waxaa la baari doonaa qofka soo wacay qofka uu yahay inta aan macluumaadka la siinin kahor. Kadibna dib ayaa loo waci doonaa si loo hubsado xaqiiqda wicitaanka. Oggolaanshaha waalidka ayaana loo baahan doonaa marka loo eegayo nooca macluumaadka la raadinayo.

Barnaamijyada Baaritaanka Sannad laha ah

Arraga iyo maqalka dhammaan ardayda ku sugan dugsiga barbaarinta carruurta, ee kala ah heerarka koowaad, labbaad, seddaxaad, shannaad, toddobaad iyo sagaalaad ama ardayda ah kooxo da'da isku dhigma kuwaasi oo loo wareejiyay baaritaan waxaa la baari doonaa inta lagu guda jiro sannad dugsiyeedkawaxaana baaritaankaasi ku samayn doona kalkaalisada dugsiga, macalinka, maamulaha ama qof kale oo u qalma oggolaanshaha ka haysta degmada dugsiga, sida qaanuun ahaanba loogu baahan yahay.

Waalidiinta ama mas'uulka ayaa lagu wargelin doonaa marka daciifnimo la helo.

Qodobkan laguma dabakhi karo arday kasta kaasi oo waalidkiisu ama mas'uulkiisu kasoo horjeedo diin ama arrimo shakhsi wax ku lugta leh darteed.

Xarunta daryeelka ilkaha

Dugsiyada Dadweynaha Denver waxay ka qaybqaadan doonaan barnaamij wada shaqayn ah oo ay la samaynayaan Carruurta u Baahan Caafimaadka ilkaha (KIND) si ay u siiyaan ardayda daryeel ilkaha ah kuwaasi oo aan haysan meel kale oo ilkaha daawaysa.

1. Maareynta iyo fulinta hawsha waxay ahaan doontaa mas'uuliyada Carruurta u Baahan Caafimaadka ilkaha KIND.

2. Dugsiyada Dadweynaha Denver waxay bixin doonaan qalab muuqaal ah iyo alaabo hawsha lagu qabto oo kaliya. Ka qaybgalka degmada dugsiga waxay noqon doontaa mid xaddidan sida korba lagu sheegay. Degmadu maqaadi doonto mas'uuliyada shaqaalaha ama go'aanada siyaasadda wakaalada ee fulinta daryeelka ilkaha.

3. Dugsiyada Dadweynaha Denver waxay diidayaan in ay qaadaan mas'uuliyad kasta oo xirfadaysan.

Qaybaha waxaa la bilaabay 5 Janaayo, 1959, 21 Febraayo , 1964 iyo 19 Janaayo, 1973
Loo muraajaceeyay si loo waafijiyo habdhaqanka: taariikhda ansixinta buuga tusaalaha bixiya

TIXRAACA SHARCIGGA: C.R.S. 18-6-101

C.R.S. 22-1-116

C.R.S. 22-32-110 (1)(bb)

C.R.S. 22-33-106 (2)

C.R.S. 25-4-901 *et seq.*

C.R.S. 25-6-102

Faylka: JLC

TIXRAACYADA KALE EE LA EEGAYO.: JEC, Oggolaanshaha Ardayga/Katagida Dugsigga
JHD, Kareebida iyo Kacafinta Imaatinka Dugsiga

JLCB, Talaalka Ardayda

JLCC, Gudbi kara/Cudurada Faafta

JLCCA, Ardayda qabta cudurada HIV/AIDS

JLCD, U maareynta Ardayda Daawooyinka

JRA/JRC, Qoraalada Ardayga/Siidaynta Macluumaad Ardayda ku saabsan